# Horumarinta Amaanka Park Iyo Portland

## Dulmar guud ee mashruuca

Degmada Hennepin waxa ay qorsheyneysaa horumarinta Wadada Park (County Road 33) iyo Portland (County Road 35) inta y dhaxeysa iyo Wadada 46aad (County Road 46).

Wadooyinka Park iyo Portland waa lamaane mid walba jiho kaliya u socda oo leh khadka bushku-leetiyada laga bilaabo faras magaalada ilaa koonfurta Minneapolis.

## Ujeedooyinka Mashruuca

- Horumarinta amaanka ee wadooyinka Park iyo Portland
- Xoojinta ka gudubta dadka lugeynaya ee ka talaabaya, giraan ku cararaya iyo bushkuleetiyada
- Abuuritaanka, khad bushkuleetiyada oo amaan ah dadkuna jecleystaan
- Dhaqan gelinta qodobada keeni karta in gawaan tartiib u socdaan




## Waxyaabaha aad nala wadaagteen

Kooxda mashruucu waxa ay ka qeyb geliyeen bulshada intii u dhaxeysay Maarso ilaa Nofeember 2024 si ay ula socodsiiyaan mashruuca oo u fahmaan sida bulshada u isticmaasho goobahaas. Jawaabaha iyo ra'yi dhiibashada kulamada loo qabtay 11 xaafadood, laba kulan oo dadweynaha u furan, iyo todoba kulan oo aan horay loo sii qorsheyn ayaa daraasad lagu sameeyey oo loo kala saaray sida hoos ku xusan:

- Horumarinta nabadgelyada iyada oo la yareynayo xawaaraha gawaarida, xoojinta sida lagu arki karo dadka ka talaabaya wadooyinka, laka saaaridda bushkuleetiyada iyo gaadiidka iyo yareynta xajmiga wadada
- Joogteynta goobaha gaadiidka la dhigto ee hareeraha wadada
- Kordhinta nalal dheeraad ah iyo dhulka cagaaran

# Fikradaha naqshadda ee Horudhaca ah

Ujeedada ugu weyn ee mashruucan waa horumarinta guud ahaan nabadgelyada degaankaas oo dhan taasoo lagu gaari karo isticmaalka habab kala duwan sida kordhinta marshabiyeedigа, iyada oo kor lo qaado, nalal iftiimaya oo lagu rakibo, iwm. Waxyaabahaasi waxa ay xoojinayaan amaanka dadka lugta ah, kuwa giraanta saaran, gaadiidka wata, ama isticmaalaya gaadiidka dadweynaha.

Khadka bushkuleetiyada waa la horumarinayaa iyada oo lagu darayo badbaadada marshabiyeedigа si looga badbaadiyo gawaarida wadada mareysa. Khadka iminka jira ee bushkuleetiyada iyo goobaha gaadiidka la dhigto qeyb ayaa laga goynayaa taasoo u ekeysiineysa kuwo ciriir ah si ka hortag dheeraad ah loogu sameeyo bushkuleetiyada.

Inta badan goobaha gaadiidka la dhigto ee aaggan waa la badaadinayaa. Qaar ka mid ah goobaha gaadiidka la dhigto saamayn ayuu ku yeelanayaa goobaha lagu talinayo horumarinta amaankooda. improvements are proposed.

## Naqshadda iminka jira




## Naqshadda Fikradda




**Halkan ka dawoo horudhaca fikradda naqshadda:**
bit.ly/4inLNZG

## Talaabada xigta:

2024 | 2025 | 2026 | 2027 | 2028

**Naqshadda horudhaca ah**
Qaboobaha 2024 - Kuleylaha 2025

**Naqshadda ugu dambeysa**
Kuleylaha 2025 - Deytra 2026

**Dhismaha**
Booddo 2027 - Deytra 2028

**Dhameystir**

We are here

## La soo xiriir kooxda mashruuca

**Bogga mashruuca:**
https://www.hennepin.us/park-Portland | Ku dhaaf iimeylkaaga si laguugu soo diro xogtii u dambeysay halka ugu hooseysa bogga

**Soo booqo bogga interetka ee mashruuca:**

Hennepin